Somaliska

Sigtuna kommun




# Wadajir
## – guri iyo dugsi

Sawir: Rosie Alm

# Hordhac

Iskoollada, waxaan ku dadaalnaa inaanu iskaashi aaminaad ku dhisan la yeelanno waalid kasta, halkaas oo aanu isu aragno dhinacyo wada shaqayn leh, in xoogga la saaro waxa ugu fiican ilmaha. Iskaashi si fiican u shaqaynaya wuxuu u baahanyahay in billowgaba ay caddahay waxa cid walba ay tahay mas'uuliyaddeedu, sida qaababka iskaashigu u ekaanayo iyo waxa dadku iska kaashanayaan. Sidaas darteed waxaanu diyaarinay qoraalkan, kaas oo ansax ka ah dhammaan iskoollada degmada Sigtuna. Halkan ayaan ku caddeyneynaa waxyaabaha la filayo iyo shuruudaha aynu awoodno inaynu isku xirno – guri iyo dugsi.

## Caruur iyo arday aqoon leh

Dugsiyada hoose-dhexe iyo kan xannaanaduba waa inay aad u aaminsanaadaan in dhammaan carruurta iyo ardaydu doonayaan oo awoodaan inay guuleystaan. Waxaanu ka qaybgelinaa carruurta iyo ardayda waxbariddooda gaarka ah iyadoo loo marayo inay ka faa'ideystaan xiisahooda wax ogaansho, waxa ay xiiseeyaan, awoodahooda wax su'aalid. Waxaanu ku dhiirrigelinaa wax abuurid, geesinnimo iyo in lagu dhiirrado wixi aan la tijaabin oo ay wax kala bartaan waxna wada bartaan.

## Macallimiin  doorkooda suurtagaliya

Cilmi-baaris iyo waayo aragnimo la tijaabiyay ayaa aasaas u ah waxbarashada dugsiyada xannaanada iyo hoose-dhexe. Waxaanu nahay wehel abuurka aqoonta, shaqaale ahaan iyo wadajir ahaan dhanka carruurta iyo ardayda si loo wajaho adduun si joogto ah isu baddalaya. Waxaanu ammaan ku abuurnaa anagoo u shaqaynayna si macquul ah oo aanu si cad u ahaano macallimiin hoggaamin leh.

## Deggenaan

Carruurta iyo ardaydu waxay horumaraan oo wax ku bartaan wada shaqaynta dhexdooda ah, macallimiinta, bulshada iyo adduunka dijitaalka ah. Markaanu abuurno deggenaan wax barid helitaankooda waxaanu markaas ku salaynay aragtida macallinimo, bulsho iyo qaab dhismeed ee deegaanka wax baridda. Si waxbarashadu ay u dhiirri-geliso dhammaan carruurta iyo ardayda wax baridooda, xiisaha wax ogaansho.

”Dhammaan waa in la dareemo ammaan iyo ku qanacsanaan inta lagu jiro waqtiga" iskoolka”



Savir: Rosie Alm

# Wada shaqaynta u dhaxaysa guriga iyo dugsiga

Iskoolka mas'uuliyaddiisu waxay si cad ugu qeexan tahay sharciga iskoolka iyo manhajka waxbarashada. Maamuluhu waa inuu hoggaamiyo oo qaybiyo hawsha iskoolka. Waa maamulaha qofka gaaraya go'aanka ah sida iskoolka loo nidaaminayo, sida kharashaadka loo qaybinayo iyo sida iskoolku u shaqaynayo si loo gaaro hadafyada. Macallimiintu iyaguna waa inay mas'uul ka noqdaan waxbaridda. Waa macallinka qofka qorsheynaya, fulinaya ee la soconaya waxbarashada isla markaana dejinaya shahaado iyo qiimeyn. Ardayda joogta Iswiidhan waxaa waajib ku ah iskool tegid. In ardaydu gutaan waajibka iskool tegidda waa mas'uuliyad wadajir u ah degmada la degen yahay, maamulka iskoolka iyo waaliddiinta.

### Rajada aad ka sugeyso iskoolka iyo xarunta madadaalada (fritidshem)

- Waxaanu ula dhaqannaa cid walba oo hawshan ku jirta si tixgelin leh, saaxiibtinimo iyo ixtiraam, gudaha iskoolka, banaankiisaba iyo dhinaca baraha bulshada ee intarnatka.
- Waxaanu waxbarashada u qorsheynaa si ku salaysan dukumentiyada hoggaanka u ah iskoolka iyo macallimiinta qiimeyntooda xirfadaysan.
- Waxaanu wada shaqayn la leenahay idinka jooga guriga si loo helo waxa u fiican ardayda.
- Waxaanu u shaqaynaa in la abuuro wadajir gudaha kooxda ah iyo deggenaan ammaan, farxad iyo hubaal u ah ilmahaaga. Waxaanu u shaqaynaa qaab ka hortagid ah oo u howl galnaa mar walba haddii laga shakiyo ku xadgudub iyo takoorid.
- Waxaanu ardayda siinaa fursado ku salaysan bisaylka ay qaataan mas'uuliyad oo raad ku yeeshaan waxbariddooda.
- Waxaanu si joogto ah u qiimeynaa oo u horumarinaa hawshan iyo waxbarashada sida ardayda iyo iskoolka ugu fiican.
- Haddii aanu ka cabsi qabno in ilmahaagu aanu gaarayn hadafka aqoonta waxaa adigaaga ah waalidka aad helaysaa warbixin ku saabsan taas iyo nooca talaabooyinka uu iskuulku ku talo jiro inuu billaabo.
- Waxaanu si sanadle ah u cusboonaysiinaa qawaaniinta nidaamka iskoolka oo ardayda siinaa fursad ah inay ka qaybqaataan qaabayntaas. Waxaanu si firfircoon uga shaqaynaa in xeerarkaas ay raacaan dhammaan dadka jooga iskoolka.
- Haddii aanu ka shakino in arday ku jiro xaalad xun waxaa waajib nagu ah inaanu gudbino wargelin in laga welwelsan yahay.
- Waxaanu hubsanaynaa inaad hesho warbixin ku saabsan waxa ku cusub iskoolka dhinaca marinada isgaarsiinta iskoolka oo haddii ay jiraan wax khuseeya ilmahaaga dabcan waanu kula soo xiriiraynaa adigaaga waalidka ah.
- Waxaanu dhegaysanaynaa fikradahaaga iyo aragtiyahaaga ku saabsan hawsha iskoolka iyadoo la wada hadlayo, madal shir iyo dhinaca warsashada waalidka ee sanadlaha ah ee la sameeyo dhinaca fasallada 3, 5 iyo 8.

### Filashooyinkaaga waalid ahaan

- Adigu waxaad ula dhaqmaysaa dhammaan dadka hawshan ku jira si tixgelin, saaxiibtinimo iyo ixtiraam leh, gudaha iskoolka, banaankiisa iyo dhinaca baraha bulshada ee intarnatka.
- Adigu waxaad taageeraysaa oo ixtiraamaysaa hawsha iskoolka, nidaamka iyo aasaaska qiimeynta isla markaana si wadajir ah ugala shaqaynaysaa iskoolka waxa danta u ah ilmahaaga.
- Ilmahaaga waxaa raad ku yeelanaysa sida adigu aad uga hadasho wixi ku saabsan iskoolka. Dhinaca qaabka si fiican ula dhaqanka iskoolka iyo waxbarashada ayaad ku tusaysaa in iskoolku yahay muhiim.
- Waxaad helaysaa warbixinta ku saabsan nooca hadafka ay tahay in ilmahaagu gaaro oo ka taageraysaa in ilmahaagu qaado mas'uuliyadda waajibka iskoolka. Waxaad xitaa helaysaa warbixnaha kale ee ka imanaya iskoolka iyo hoyga wakhti firaaqaha oo aad ahmiyadda siinaysaa ka qaybgalka kulanka waalidka iyo wada hadalka horumarka.
- Iskoolku wuxuu goob shaqo u yahay ardayda iyo shaqaalaha labadaba, sidaas darteed tixgeli shaqaalaha wakhtiyadooda shaqo iyo ardaydu wakhtiga ay wax baranayaan. Marka aad doonaysid inaad iskoolka soo booqato wakhtiga iskoolka waxaad raacaysaa nidaamka dhinaca booqashada waalidka.
- Waxaad u hoggaansamaysaa iskoolka qawaaniintiisa nidaamka oo sida ardayda iyo shaqaalaha iskoolka aad kaalmo ka geysanaysaa, in kuwaas lagu dhaqmo.
- Waxaad ilmahaaga ka caawinaysa in iskoolka la yimaado wakhtigiisa lana sito alaabta iskoolka ee maalintaas, dhar ku haboon hawada jirta oo diyaar la ahaado iyadoo la soo nastay oo la soo cunay quraac.
- Haddii ilmahaagu xanuusanayo markaas waxaad samaynaysaa wargelinta bukaanka ee ilmahaaga subaxnimada sida waafaqsan nidaamyada iskoolka. U daa ilmaha inuu joogo guriga ilaa inta uu caafimaadayo.
- Ilmahaagu wuxuu xaq iyo waajib u leeyahay in la joogo iskoolka. Markii loo baahdo fasax ka baxsan fasaxa caadiga ah waa in codsiga fasaxa la buuxiyo oo uu iskoolku oggolaado ka hor.
- Waxaad la xiriiraysaa shaqaalaha haddii aad hayso su'aalo khuseeya ilmahaaga ama hawshan. Waxaad intii suurtagal ah ka qaybqaadanaysaa qiimeynta iskoolka hawlihiisa sida tusaale ahaan in laga jawaabo warsashada sanadlaha ah.

# Madasha iyo marinada dhinaca xiriirka iyo wada shaqaynta

Wada shaqaynta aanu la leenahay guriga waxaanu u haynaa qaabab kala duwan dhinaca macluumaadka iyo wada hadalka. Caawimaadda kuwaas ayaa guri iyo iskoolba si wadajir ah u qaadanayaan mas'uuliyadda dhanka iskaashiga dhinaca waxa u fiican ardayga.

### Unikum

Waalidka ay carruur ugu jirto dugsiga xannaanada iyo hoose-dhexe labadaba waxay fursad u haystaan inay carruurta oo dhan warbixintooda ka arkaan abka Unikum Familj.

### Xiriirka

Xiriirkan waxaa lagu soo diraa isagoo fariin ah gudaha Unikum. Halkaas ayaad ka ogaan kartaa maalinlaha caadiga iskoolka ee ilmahaaga iyo warbixino ka yimi macallimiinta iyo maamulaha iskoolka.

### Macluumaadka ka imanaya maamulaha iskoolka

Maamulaha iskoolka ayaa si joogto ah u wargelinaya dhammaan waaliddiinta iyadoo loo marayo Unikum. Qaabkaas ayaad ku ogaanaysaa iskoolka jadwalkiisa iyo wareega sanadka iyo warbixin ku saabsan dhacdooyinka cusub ama isbaddalada.

### Horumarka aqoonta

Qoraalada ku saabsan horumarka aqooneed ee ilmahaaga iyo waxa dheeraadka ah waxaad sidoo kale ka helaysaa gudaha Unikum.

### Wada hadalka horumarka

Sanad dugsiyeed kasta ayaa iskoolku kugu casuumayaa adigaaga waalidka ah wada hadalka horumarka ardayka. Ujeeddada wada hadalka horumarka waa in lagugu wargeliyo waxbarashada iyo horumarka ilmahaaga iyo nooca hadafka horyaala ilmahaaga muddada soo socota. Ujeeddadu waa xitaa in aynu ka wada hadalno sida innagu, guri iyo iskool aynu qaabab kala duwan u taageeri karno ardaygan si loo gaaro hadafka.

### SchoolSoft

Warbixinta ku saabsan iskool ka maqnaanshaha ilmahaaga iyo jadwalka waxaad ka helaysaa abka SchoolSoft.

### Hoyga wakhtiga firaaqada

Adigaaga waalid u ah carruur ku jirta hoyga wakhti firaaqaha waxaad wakhtiyada joogista ee ilmahaaga gelinaysaa abka SchoolSoft.

### Maqnaanshaha/iskool jaridda aan la oggolayn

Haddii arday bilaa oggolaansho kaga maqnaado waxbarashada waxaa adigaaga waalidka ah aad helaysaa fariin taas ku saabsan isla maalintaasba.

### Nidaamyada xilliga booqashada waalidka

Booqashada waalidka badanaaba waa mid wax badan lagu barto oo u fiican waalidka iyo ardayda labadaba. Sidaas darteed waxaanu idinkiina waalidka ah idinku soo dhowaynaynaa inaad timaadaan oo ka qaybqaadataan hawshan. Haddii aad doonaysid inaad ballansanto kulan waalid waa inaad sidaa sameyso wakhti fiican ka hor oo la tashato macallinka safka. Si wadajir ah ayaad u heli doontaan maalin ku haboon si aysan booqashadu ugu beegmin kalfadhiyada imtixaamada iyo si macallinka safka u sii haleelo in la sii diyaariyo ardayda xaasaasiga ka ah dad waaweyn

oo cusub oo jooga gudaha fasalka. Macallnka fasalka wuxuu sidoo kale u baahan yahay in booqashadan ka hor loo sii sheego maamulaha iskoolka maadaama aan u baahanahay inaan ogaano dadka jooga dhismahan. Iskoolka waxaa ku jiri kara arday iyo shaqaale leh aqoonsi la ilaaliyo oo amaankooda darteed waxaa muhiim ah in adigaaga ah qof weyn oo jooga aagga iskoolka aad ixtiraamto xog qarinta sirta oo aanad filim ama sawiro ka qaadin ardayda ama shaqaalaha.


Sawir: Mostphotos

### Telafoon

Haddii aad doonaysid inaad telafoon kula hadasho qof ka mid ah shaqaalaha waxaad marka hore qofkaas u diraysaa ii-mayl markaas annaga ayaa kula soo hadlayna marka aanu fursad helno. Xiriiryada telafoonka waxay dhacayaan inta lagu jiro waqtiga shaqada.

**”Kulamada gaarka ah ee lala yeelanayo shaqaalaha waxaa la ballaminayaa oo ay dhacayaan inta lagu jiro waqtiga shaqada”**

### Welwel iyo aragtiyo

Haddii adigu waalid ahaan aad hayso su’aalo ama dareemayso welwel dhinaca xaalada ilmahaaga ee iskoolka waa inaad ugu horeyn la xiriirto qofka madaxa ka ah fasalka/la taliyaha ilmahaaga maadaama qofkaas uu si fiican u garanayo ilmahaaga. Haddii su’aalahaagu ku saabsan yihiin maaddo cayiman waxaad toos ula xiriiri kartaa macallinka maadaadaas. Haddii aad dareento
in weli welwelkaagu jiro waa inaad la xiriirto maamulaha iskoolka.

Haddii inkastoo wada hadal aad la yeelatay maamulaha iskoolka aad weli dareemayso welwel ama u aragto in aanad helin jawaabta aragtidaada waxaad la xiriiraysaa degmada maamulkeeda carruurta iyo dhalaanka iyadoo loo marayo degmada bogeeda intarnatka halkaas oo aad raacayso xiriirka aadaya ”Tyck till”.

Adigaaga waalidka ah waxa kale oo aad la xiriiri kartaa degmada Sigtuna wakiilkeeda carruurta iyo ardayda (BEO). Wakiilka carruurta iyo ardayda waxay ka shaqeeyaan arrimaha khuseeya taageero gaar ah, xad gudubyada, ammaan yaraaday iyo ula dhaqanka si isku mid ah. BEO waxay mar walba wax ku saleeyaan ilmaha iyo ardayda xuquuqdooda oo si cad xoogga loo saarayo dantooda. Haddii adigu waalid ahaan aad dareento in xiriirka aad la leedahay iskoolka uu leeyahay daldaloolyo waxaa BEO ay u shaqayn kartaa in la hubiyo in dadka oo dhan codkooda la dhagaysto. Waxaa xitaa lala xiriiri karaa BEO iyadoo aan magac la sheegin dhinaca arrimaha khuseeya hab la dhaqan xad gudub ah iyo takoorid dhinaca dugsiyada xannaanada iyo iskoolada. Macluumaadka xiriirka BEO waxaad ka helaysaa dhinaca degmada Sigtuna xarunteeda xiriirka ee telafoon lambar **08-591 260 00**.

### Dib ula soo xiriirid iyo jawaab

Haddii aad ii-mayl u dirto macallin ama maamulaha iskoolka waxaad filan kartaa inaad jawaab hesho saddex maalimood gudahood waqtiga shaqada, waa haddii qofka aad raadisay aanu xanuusanayn ama fasax ku jirin. Haddii aad la xiriirto shaqaalaha degmada maamulkeeda waxaad isticmaalaysaa waxa lagu magacaabo ”Tyck till” ee bogga intarnatka oo waxaad jawaab helaysaa gudaha shan maalmood oo shaqo.

# Qawaaniinta iyo nidaamka

Ardayda iyo shaqaalaha jooga iskoolka oo dhan waa inay si wadajir ah uga shaqeeyaan si loo helo deggenaan shaqo oo fiican oo si waafaqsan sharciga iiskoolka oo ay ku heshiiyaan nooca qawaaniinta nidaamka ee ansax ka ahaanaya iskoolka. Si dadka oo dhan u awoodaan inay raacaan qaawaaniinta waa muhiim in cid walba, ardayda iyo dadka waaweyn ee iskoolka labaduba, ay ogyihiin qawaaniinta nidaamka iyo waxa dhacaya haddii qof uu jebiyo kuwaas.

Iskool walba wuxuu leeyahay qawaaniintiisa nidaam. Qawaaniinta nidaamka waxaa wax ka baddala ardayda, shaqaalaha iyo waaalidka xilliga cusboonaysiinta qorshaha ka hortaga takooridda iyo dhaqanka xad gudubka sanad walba. Xilliga billowga iskoolka ayaa adigaaga waalidka ah aad si wadajir ah ula eegaysaa ilmahaaga qawaaniinta nidaamka oo saxiixan. Fikraddu waa in ay ahaato fursad aad adigaaga waalidka ah aad wada hadal la yeelato ilmahaaga wixi ku saabsan qawaaniinta nidaamka. Saxiixu waxuu noqonayaa astaan ah in aad ku heshiiseen inaad raacdaan heshiiska.

### Tallaabooyin anshax marin ah si waafaqsan sharciga iskoolka

Maamulaha iyo shaqaaluhu waa inay ardayda u abuuraan ammaan iyo xasilooni waxbarasho oo ay faro gelin sameeyaan si loo saxo arday abuuraya welwel. Maamulaha iskoolka iyo macallimiinta ayaa markaas si dhakhso ah u qaadaya tallaabooyinka loo baahanyahay si ardayda loogu dammaanad qaado ammaan iyo xasilooni waxbarasho ama sidii loo sixi lahaa arday dabeecadiisa dhibta ku ah nidaamka. Tallaabooyinka anshax marinta ee ku nidaamsan sharciga iskoolka waa: **kala wareegida alaab, ka saarid fasal, joogista wakhtiga iskoolka kadib, iskool baddalid** iyo **ka joojin iskool wakhti kooban**.

Iskool kastaa wuxuu leeyahay sharraxaadda nidaamyada marka qof jebiyo qawaaniinta iskoolka.

# Jihooyinka wadajirka ah ee loogu talogalay ammaanka iyo xasiloonida waxbarashada

Jihooyinka wadajirka ah ayaa ansax ka ah iskoolada oo dhan, iyadoo aan loo eegayn iskoolka qawaaniintiisa nidaamka. Sharciyada ansaxa ka ah bulshada inteeda kale ayaa sidaas oo kale ansax ka ah iskoolka. Waxaa fiican in la ogaado in haddii uu dhaco dembi sharciyan ah ay taasi keeni karto in iskoolku u gudbiyo dacwo boliiska.

### Takoorid iyo dhaqan xad gudub ah

Dhacdo kasta oo ah takoorid iyo dhaqan xad gudub ah waxay natiijadeedu noqonaysaa ficil celin ka timaada shaqaalaha jooga iskoolka. Arrin kasta waa lala soconayaa oo la maareynayaa.

### Kombiyuutar/Ipad

Waxaanu leenahay qawaaniin kombiyuutar oo wadajir ah kuwaas oo ardaydu saxiixaan xilliga kombiyuutar ama Ipad lagu qaybinayo iskoolka.

### Telafoonada moobilka ee gaarka loo leeyahay

Iskoolada oo dhan waxaa qawaaniintooda nidaamka ku jirta qayb khuseysa isticmaalka telafoonada moobilka ee gaarka loo leeyahay. Kuwaas ayaa sharraxa sida qofka arday ahaan loogu oggolyahay isticmaalka telafoonada moobilka ee gaarka loo leeyahay inta lagu jiro wakhtiga ay joogaan iskoolka.

### Maqnaanshaha/iskool jaridda aan la oggolayn

Haddii arday bilaa oggolaansho kaga maqnaado waxbarashada waxaa adigaaga waalidka ah aad helaysaa fariin taas ku saabsan isla maalintaasba.

### Mamnuucid daroogo

Waxaa mamnuuc ka ah iskoolada daroogada. Mamnuuciddan waxa ku jira dhammaan noocyada tobaakada, khamriga iyo mukhaadaraadka iyo dawooyin aanu dhakhtar qorin. Iskoolka ayaa la soo xiriiraya adigaaga ah waalidka haddii laga shakiyo ama la ogaado in ilmahaagu ku dhex jiro nooc ka mid ah daroogo. Arrin kasta waa lala soconayaa oo la maareynayaa.

### Waxyaabo dhib keenaya

Shaqaalaha iskoolka waxaa sharcigu u oggolyahay inay gacanta ku dhigaan alaab loo isticmaalayo qaab rabshad ku ah waxbarashada ama keeni karta khatar. Shay keenaya khatar waxaa loo dhiibayaa booliiska. Shay lala wareegay, laakiin aan keenayn khatar, waxaa dib loogu celinayaa ardayga xilliga dhammaadka maalin iskool.

### Khasaare

Khasaare dhanka hantida iskoolka ah waxaa la wargelin karaa booliiska. Waalid ahaan waxaa fiican in la ogaado in magdhabidda khasaare laga dooni karo ardayga sababay khasaarahaas. Haddii arday wax jebiyo ama wax ka qaato arday kale waa ardayga sababay khasaarahan qofka ay waajib ku tahay magdhabiddu.

### Dadka aan shaqo ku lahayn ma loo oggalayn inay booqdaan iskoolka

Dadka aan shaqo ku lahayn ma loo oggola inay joogaan aagga iskoolka inta lagu jiro wakhtiga iskoolka ama xilli firaaqaha. Haddii aanu aragno qof aan haysan sabab uu ku jooga iskoolka aaggiisa waanu la hadlaynaa oo u sheegaynaa qofkaas inuu meesha ka tago.



Sawir: Rosie Alm

# La socodka hawshan

Degmada Sigtuna iskooladeedu waxay leeyihiin hawl wadajir ah oo ah joogtaynta tayada. Tani micnaheedu waa in iskoolada oo dhan ay si joogto ah u qiimeeyaan oo u horumariyaan hawshan si waafaqsan nidaam wadajir ah. Hoggaanka ayaa la soconaya ammaanka, ku qanacsanaanta iyo xasiloonida waxbarasho oo waxaa loola soconayaa qaababkan soo socda:

## Baarritaanno wareysi ah

Inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka waxaanu fulinaa laba wareysi kuwaas oo aanu kula socono ammaanka iyo xasiloonida waxbarasho ee iskoolka:

## Ammaan, ku qanacsanaan iyo xasilooni waxbarasho

Ardaydu aragtidooda ammaan, ku qanacsanaan iyo xasilooni waxbarasho waxaa lagala soconayaa wareysiga xilliga dhammaadka deyrta. Dhammaan ardayda laga billaabo fasalka 1 ilaa 9 ayaa ka qaybqaadanaya wareysigaan. Wareysigaan waxay jawaab siinaysaa wixii u baahan in tallaabo laga qaado oo diiradda saaraysaa tusaale ahaan meelaha ardaydu ku dareemayaan amaan darro.

## Warsashada waalidka iyo ardayda

Sannad walba waxaa la fuliyaa wareysiga waalidka iyo ardayda ee fasallada 3, 5 iyo 8 taas oo qiimeysa howlahan mid walba tayadeeda. Wareysigan waxaa ku jira su'aalo ay ka mid yihiin ka qayb qaadashada, xiriirka iyo iskaashiga. Natiijada ka soo baxda wareysigan oo dhan ayaa la isu geynayaa oo la baarayaa dhanka heerka iskool iyo degmo labadaba guud ahaan. Iyadoo ku salaysan wareysigaas ayaa la qaadayaa tallaabooyin iyo hawlo ay ujeeddadu tahay in la horumariyo hawshan, sidaas darteed ayay muhiim tahay in waalid badan ilaa inti suurtagal ah ay wakhti siiyaan in laga jawaabo wareysiga.

## Qorshaha ka hortagga takoorid iyo dhaqan xad gudub ah

Sanad walba waxay iskooladu cusboonaysiiyaan qorshaha ka hortagga takoorid iyo dhaqan xad gudub ah. Ujeeddada iskoolka hawshiisu waa in la joojiyo, laga hortago oo la xanibo dhaqanka xad gudubka ah, takoorid iyo in qof la dhibo dhinaca iskoolka. Iskool walba qorshihiisa waxaa la sameeyay marxalad imminka ah taas oo lagu baaro dhammaan gogol-dhigyada khuseeya hawsha ammaanka ee iskoolka oo la ururiyaa taas. Qorshahan waxaa ku jira xitaa howlaha iyo tallaabooyinka laga soo qaatay iskoolada qorshahooda shaqo iyo hoggaanka (degmada) qorshayaasheeda hawleed. Shaqaalaha iskoolka ayaa qorshahaas si wadajir ah ugala shaqeeya ardayda.

## Dib ula xiriirka waalidka

Kulanka waalidka ee deyrta ayaa adigaaga waalidka ah aad ogaanaysaa iskoolka hawshiisa ammaanka iyo natiijada ka soo baxday baaritaanada warsashooyinka. Hoggaanka (degmada) ayaa isu geynaysa xitaa natiijada tayo ee maamulka oo dhan oo ku jirta soo bandhiga sanadle ee tayada taas oo lagu daabaco degmada bogeeda intarnatka.

**"Wada shaqayn aaminaad leh iyadoo xoogga la saarayo waxa u fiican ilmaha"**

## Waad ku mahadsantahay dadaalkaaga

Si wadajir ah ayaynu u kaalmayn karnaa iskoolada iyo dugsiyada xannaanada si halkaas ay dadka waaweyn iyo carruurta ay labaduba u dareemaan ammaan, ku qanacsanaan iyo xasilooni waxbarasho.

Daabacaad: Adeega daabacaadda Tryckservice Ängelholm, 2022 Qaab daabacaad: Matador Kommunikation AB

Sigtuna kommun

**Degmada Sigtuna**
Södergatan 20, 191 85 Märsta
Telafoon: 08-591 260 00
**www.sigtuna.se**

Buuggan yar waxaa la helayaa xitaa isagoo ah luqaddaha soo socda: Ingiriisi, Urduu, Carabi, Soomaali iyo Fiinlaandiis. Qaybahan luqaddeed waxaa iyagoo dijitaal ah laga soo dejisanayaa bogayaga intarnatka, www.sigtuna.se.